

Matahay waalid **guri joog ah?**

Ama **shaqo raadiye ah?**

Waxii ka
bilaawda
1da april

Markaas waxaa isbedelayaa saacadaha caruurtaada

**Caruurta waxey joogi doonaan
dugsiga xanaanada caruurta ugu
badnaan 15 saac isbuucii**



**Caruurta dugsiga
xanaanada**



15 saac



isbuucii

Maxay tahay sababta 15-ka saacadood loo hirgaliyay?

Waxaan rabnaa inta dhigata dugsiga xanaanada caruurta in ey helaan maalmo wanaagsan iyo qorshe wacan oo wada shaqeyn leh.

Yuu quseeyaa xeerka 15-saac ee loogu talagalay?

Hadii qof idinka mid ah oo aad tahiin waaladiinta uu yahay shaqo raadiye ama uu yahay guri joog markaas caruurta waxey aadi doonaa 15saacadood ugu badnaan isbuucii dugsiga xanaanada oo bilaaban doona 1da april.

Hadii aad tahiin waaladiinta aan wada degnen caruurta waxaa u xadeeysan saacado gaar ah oo inta aad guriga jootid adiga oo ah shaqo doon ama giri jog ah.

Ma i khuseyaa aniga oo wax baranaya?

Hadii loo eego in aad qeyb wax baraneyso ama waqti buuxa baraneyso ilaa iyo xad wax barshadaas (Mataal maalintii , fasaxa ama fiidkii) qolodaas oo 15ka saacadood kuma quseeyo adiga.

Ma i khuseysaa aniga oo shaqeeya wakhti barkiis?

Iyadoo aan loo eegin baaxadda shaqadaada (qayb ama wakhti buuxa) iyo iyadoo aan loo eegin markaad shaqeyneyso (dhammaadka toddobaadyada, dhammaadka asbuuca, fiidka iyo wixii la mid ah) aadan ku jirin xeerka 15 saacadood.

Ma i quseysaa aniga oo ku jira fasaxa jirada?

Hadiiba aad horeyba u eheed shaqo la aan ama waalid guriga joogo 15kaas saacadood oo sharciga ah waa ku quseeyaa xataa hadii aad xanuunsantahay.

Taas waxii ka sareeya waxaad kala xaajoo kartaa maamulaha iskuulka.

Ma i quseysa hadii aan noqon rabo waalid cusub?

Haddii aad caruur ku leedahay dugsiga barbaarinta oo aad dhashay cunug kale, sharciga 15ka saacadood si toos ayuu kuu quseeyaa. Maamulaha dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ayaa kuuu oggolaan karo.

Sideey ahaan kartaa 15 saacadood?

Waxaan idinkula talin laheen in aad keen sataan talaado ilaa khamiis min 5saac maalintii. Waxii kale waxaa kala tashan kartaa maamulaha.

Ilmahaygu ma heli doonaa cunto 15-kii saacadood?

Saacdaha cuntada hadiiba ay joogaan wey leeyahiin.

Waxaa jira macluumaad dheeraad ah?

Soderhamn.se waxaad ka heli doontaa macluumaad faahfaahsan. Macluumaadka informationsoderhamn.se waxaad ka heli doontaa xaqiiqooyinka luuqadaha aan ahayn iswiidhishka. Bogga xiga waxaad ka heli doontaa foom si aad si fudud ula xiriirto dugsiga xanaanada caruurta.